

LACAG CELINTA TIKIDHADA BAARKINKA MAGAALADA SEATTLE

SU'AALAH A INTA BADAN LA ISWAYDIYO

(1) Goorma ayaan filan karaa inaan helo lacag celintayda?

Lacag celinta Tikidhada Baarkinka waxaa la bixin doonaa laga bilaabo asbuuca Juun 6 deeda, 2022. Haddii aad lacagta ku bixisay kaarka amaahda ama kaashka ama lacag wareejinta Khadka ee Tooska ah (Automated Clearing House, ACH) adoo isticmaalaya webseedka maxkamada ama nidaamka tooska ah ee taleefanka, markaas lacagtaada waxaa dib loo soo gelin doonaa kaarka ama akoonka. Fadlan xoogaa dulqaado si lacagta laguugu soo celiyo. Haddii akoonkaagu xirmay, la xariir Shirkada Akoonku Ka diiwaangashanaa (Third Party Administrator, "TPA").

Haddii aad lacagta ku bixisay lacag kaash ah, jeeg, ama qaab dalab ah, TPA waxay lacagta u diri doontaa mulkiilaha gaariga tikidhka loo jaray, markay taariikhdu tahay ama kahor Luulyo 18, 2022. Si aad u oggaato xaalada jeegaaga ama codsigaaga dib usoo celinta lacagta, iimayl udir Administrator@ParkingTicketRefund.com ama wac (888) 589-0114.

(2) Si toos ah ma usoo qaadan karaa lacag celinta?

Maya, lacag celinta qofka si toos ah looma siin doono. Dhammaan lacagaha la celinaayo waxaa dib loogu diri doonaa kaarka ama akoonka baanka markii hore laga soo diray, ama jeeg ayaa qofku loogu diri doonaa boosto.

(3) Tikidhkee ayaa u qalma in lacagta loo celiyo?

Tikidhada loo jaray baabuurta baakinka iskaga jira ee aan dhaqaaqin laga bilaabo Sebteembar 1, 2021 ilaa Abriil 5, 2022, oo ay u jareen kooxda Hawlaha Baakinka ayaa u qalma in lacagta loo celiyo. Tikidhada kale sida tikidhada taraafikada, ama tikidhada ay bixiyeen Saraakiisha Booliska Seattle uma jiraan. Haddii aadan wali hubin, fiiri in tikidhka loo jaray gaarigaaga uu u qalmo lacag celin.

(4) Tikidhada kaamirada taraafiga mala baabi'iyaa ama mala celiyaa lacagtooda?

Maya, tikidhada kaamirada taraafiga ee ay jartay Waaxda Booliska Seattle mana u qalmaan in la baabi'iyoo ama lacagtooda dib loo celiyo. Kaliya tikidhada loo jaray baabuurta baakinka iskaga jira ee aan dhaqaaqin oo ay u jareen kooxda Hawlaha Baakinka laga bilaabo Sebteembar 1, 2021 ilaa Abriil 5, 2022, ayaa ku jira.

(5) Ma inaan gudbiyaa cabasho la xariira baabi'inta ama helida lacag celinta?

Maya, uma baahnid inaad soo gudbiso wax cabasho ah. Magaalada ayaa sameysa oo dhammaan baabi'in doonta dhammaan dadka u qalma, tikidhada Baakinka ee aan la bixin. Lacag celinad waxaa loo sameyn doonaa si toos ah, waxaana dib loogu celiyaa midkood kaarka ama akoonka baanka markii hore laga soo diray, ama waxaa jeeg loogu diraa qofkii bixiyay ama mulkiilaha ku diiwaangashan gaariga.

(6) Waxaan tikidh u qalmo u bixiyay kaarka amaahda; sidee lacag celinta ku heli doonaa?

Lacagaha lagu bixiyay kaarka amaahda ama kaashka ama lacag wareejinta Khadka ee Tooska ah (Automated Clearing House, ACH) adoo isticmaalaya webseedka Maxkamada Deegaanka ama nidaamka tooska ah ee taleefanka waxaa dib loogu celin doonaa meeshii laga soo diray. Lacag bixinta kaarka amaahda, kaarka amaahda wuxuu kasoo muuqan doonaa koontada si lacagta dib loogu celiyo tikidhada u qalma. Haddii kaarkaaga lacagta ama akoonkaaga la xiray kadib markii aad bixisay Tikidhka Baarkinka, markaas jeeg ayaa laguugu soodiri doonaa boosto. Haddii qof uu codsado dhageysi kahor inta aan la bixin, jeega waxaa loo diri doonaa qofkaas; haddii kale, waxaa loo diri doonaa mulkiilaha gaariga arrintu ku saabsan tahay.

(7) Waxaan ku bixiyay tikidhka u qalmo waqtiga saxda ah ee loo qorsheeyay. Ma heli doonaa lacag celin? Lacagta qorshaha dejinta ee \$4 miyaa lasoo celin doonaa?

Dhammaan lacagaha lagu codsado bixinta tigidhada xaqa u leh waxaa lagu celin doonaa kaarka lacag lagu bixiyay ama jeeg loo diri doono qofka leh akoonka lacagta. Khidmada \$4 doolar ee lagu bixiyo sameynta dib ayaa loosoo celin doonaa inta badan, laakiin waxaa laga yaabaa inaan dib loo soo celin haddii tigidhada u qalma lagu daray qorshaha isku waqti tikidhada kale ee aan u qalmin lacag celinta.

(8) Waxaan bixiyay tikidh u qalma kadib markaas sameeyay adeeg bulsho; ma heli doonaa lacag celin?

Dhammaan saacadaha adeegga bulshada ee la dhameystiray laguna saleeyay tigidhada xaqa u leh dib ayaa loosoo celin doonaa lacagtooda ayadoo jeeg la siinaayo qofka dejiyay qorshaha adeegga bulshada, ayadoo lagu saleynaayo qiimaha shaqaynayey markii saacadaha la helay, oo ah ilaa lacagta guud ee tigidhka.

(9) Maxay tahay sababta aanan u helin lacag celin?

Haddii tikidhkaagu u qalmo lacag celin oo aan lagu soo celin lacagta, halkaan waxaad ka helaysaa qaar kamid ah waxyaabaha laga yaabo inay sababeen:

- (a) Haddii aad ku bixisay lacagta kaarka amaahda ama kaashka ama lacag wareejinta ACH adoo adeegsanaaya webseedka maxkamada deegaanka ama nidaamka tooska ah ee taleefanka, lacagtaada waxaa dib loogu soo celin doonaa kaarka aad ku bixisay ama akoonka, illaa in kaarka amaahda ama akoonka banka la xiray maahee. Fadlan xoogaa dulqaado si lacagta laguugu soo celiyo. Haddii akoonkaaga la xiray, la xariir TPA si aad u cusbooneysiiso macluumaadka akoonkaaga ama kaarkaaga.
- (b) Inta badan lacagaha cadaanka ah, jeegga, ama lacagaha dalabka ah waxaa la siiyaa mulkiilaha ku diiwaangashan baabuurka tikidhka loo jaray sababtoo ah, inta badan, magaca iyo ciwaanka qofka bixiyay lacagta lagama diiwaangaliyo nidaamkeena. Haddii aad bixiso lacagta tikidh lagu soo diray gaari aadan adigu lahayn, la xariir TPA si aad u cusbooneysiiso xogta lacag bixinta.
- (c) Haddii aad lacagta ku bixisay caddaan, jeeg, ama dalab lacageed aadna ku bixisay boosto ama Xarunta Adeegga Macaamiisha aadna guurtay tan iyo markii aad cusbooneysiisay

ciwaanka diiwaanka gaarigaaga, waxaa laga yaabaa in jeeggaaga lagu soo diro boosto laguna soo hagaajiyo ciwaankii hore. Lacagta celinta waxaa loo diray mulkiilaha ku diiwaangashan lambarka taarikada baabuurka. Hubi macluumaadkaaga diiwaangelinta adigoo adeegsanaaya Waaxda Ruqsadaha gaar ahaan qaybta laga badeli ciwaanada wa.gov/vehicleregistration, ama wac DOL adoo ka wacaaya (360) 902-3770. Haddii ciwaanka uu ka diiwaangashan yahay gaarigaagu uusan ahayn kan hadda, la xariir TPA si aad u cusbooneysiiso ciwaanka boostada.

(10) Ma ihi mulkiilaha ku diiwaangashan gaariga mana bixin amar lacageed oo taraafiko, laakiin waxaan helay jeeggaan. Maxaan sameeyaa??

La xariir TPA si aad ogala hadasho sida loo maareeyo ama loo celiyo jeegga haddii aad aaminsan tahay inaad u qalmin. Fadlan gacanta u hayso jeegga marka aad wacayso.

(11) Waxaan helay jeeg lacag celin, waxaana u malaynayaa inay u qoran tahay lacag qalad ah.

Xaqiiji cadadka lacagta lagu bixiyay tikidhkaaga [adoo fiirinaaya tikidhkaaga aad u qalanto](#). Haddii aad wali aaminsan tahay in cadadka lacag celintaadu ay wali qaldan tahay, la xariir TPA.

(12) Waxaan bixiyay tikidhka u qalmo kadibna waxaan u guuray meel kale; ma inaan wax sameeyaa si aan lacag celintayda u heli?

Haddii aad xaqiijiso in gaarigaagu uu helay tikidh aadna u qalanto lacag celin, la xariir TPA kadibna sheeg ciwaankaaga boostada ee hadda.

(13) Waxaan bixiyay tikidh u qalma ee gaari aan anigu lahayn; ma heli doonaa lacag celin?

- (a) Haddii aad lacagta ku bixisay kaarka amaahda, kaarka kaashka, ama lacag wareejinta Khadka ee Tooska ah adoo isticmaalaya webseedka maxkamada Deegaanka ama nidaamka tooska ah ee taleefanka, markaas lacagtaada waxaa dib loo soo gelin doonaa kaarka ama akoonka.
- (b) Haddii aad lacagta si toos ah u geysan Maxkamada Degmada Seattle, ama haddii aad jeeg si toos ah ugu dirtay Maxkamada, waa inaad hesho jeeg lacag celin.
- (c) Haddii aad lacagta ku bixisay Xarunta Adeegga Macaamiisha ama adiga oo isticmaalaya baqshadda lacag soo celinta ee la dulsaaray baabuurka tigidhka loo jaray, waxa hubaal ah in jeegag lacag celin ah la siin doono mulkiilaha gaariga ku diiwaangashan.
- (d) Haddii aadan helin lacag celin aadna bixisay tikidh lagu soo diray gaari aadan lahayn, la xariir TPA.

(14) Baabuurkayga waa la jiiday; ma heli doonaa lacag celin kharashyo kasta oo la socda oo ay tahay inaan bixiyo?

Tigidhka looma baahna in la jiiddo baabuur si sharci dara ah meel loo dhigay. Iyo wakiil kasta oo aan la oggolaan ee Waaxda Booliska Seattle ay codan karto jiidis. Wakhtiyada oo dhan, Saraakiisha

Xoojinta Baabuur dhigashada waxay ahaayeen wakiilada la oggolaaday ee Waaxda Booliska Seattle ee ujeedadaas. Sidaas awgeed, ma habbaynayno lacag celinta jiidista. Dabcan, taasi ma saamyso xuquuqda qofka uu leeyahay dhegaysiga caqabada jiidista sida lagu bixiyaya Cutubka 11.30.